

Sabtida 12-ka febraayo ayaa la qaadayaa tillaabooyinkii ka hortagga cudurka

Waxay dawladdu qaadaysaa dhammaan tillaabooyinkii covid-19 ee xeer-hoosaadka ku soo baxay, ayna ku jiraan waajibkii af-daboolka, masaafadii halka mitir iyo waajibkii in dadka gooni looga baxo haddii la jirrado. Qaar xeerarka ka mid ah ayaa ka sii jiri doona Svalbard. Wax-ka-beddelladu waxay dhaqangelayaan laga billaabo sabtida 12-ka febraayo saacadda 10.00.

– Cudurka koroonaha ee safmarka ah khatar caafimaad oo weyn hadda kuma aha dadka intooda badan. Fayraska omikoronkuna ma keeno xanuun weyn, tallaalkana difaac wanaagsan ayaan ka helnaa. Sidaas awgeed ayaan u qaadaynaa ku dhowaad dhammaan tillaabooyinkii ka hortagga cudurrada sida mitirkii, waajibkii af-daboolka iyo kii gooni u bixidda. Waxaan u laaban karnaa nolol maalmeed caadi ah, ayuu yiri raysal wasaare Jonas Gahr Støre.

Go'aanku wuxuu ku salaysan yahay talooyin cilmi ku dhisan oo laga helay Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI) iyo Agaasinka Caafimaadka. Labaduba waxay qabaan in tillaabooyinka la fududayn karo, Machadka Caafimaadka Dadweynuhuna wuxuu caddeeyay in ay taasi tahay mid macquul ah marka la eego ka hortagga cudurrada.

Xeer-hoosaadyada hadda la qaaday iyo talooyinka wax laga beddelay ayaa la filayaa in ay keeni doonaan in is-qaadsiinta cudurku kordhi doonto. Dad badan ayuu cudurku ku dhici doonaa, waxaana dhici karta in ay dad badani shaqada uga maqnaadaan jirro awgeed. Tirada dadka isbataallada la dhigayo ayay ayana u badan tahay in ay kordhi doonto, laakiin bukaanku wakhti intii hore ka gaaban ayay isbataallada ku jiraan, tirada u baahan daaweyn dheeraad ahna way yar tahay. Machadka Caafimaadka Dadweynuhu wuxuu qiyaasayaa in aan markiiba isbataallada la dhigi doonin bukaan ka badan 1000 qof. Taas oo ay isbataalladu awood u leeyihiin in ay maareeyaan.

- Dad badan ayuu cudurku ku dhici doonaa toddobaadyada soo socda, oo waa in aan taas u diyaargarawno. Laakiin hadda waan awoodnaa maaraynta isqaadsiinta cudurka ee kordhaysa. In kasta oo aan qaadnay waajibkaadkii xeerhoosaadyada ku salaysnaa, waxaa haddana weli muhiim ah in loo hoggaansamo talooyinka guud ee ka hortagga cudurrada. Haddiiba ay jiraan wax aan dhammaanteen xarfaan ku noqonnay intii uu cudurka safmarka ah jiray, waxaasi waa ka hortagga cudurrada. Taas waa in aan halkaas ka sii wadnaa, annaga oo isticmaalayna caqliga wanaagsan, ayay tiri wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka Kjerkol.

Qaar aad u badan oo ka mid ah tillaabooyinkii koroona ayay dawladdu qaaday 1-dii febraayo. Waxaa halkan ku qoran wax-ka-beddellada ugu muhiimsan ee dhaqangelaya laga billaabo sabtida 12-ka febraayo, saacadda 10:

- Waajibkii iyo taladii ahayd in hal mitir la kala fogaado waa la joojiyay.
- Shardiigii xirashada af-daboolka waa la joojiyay.
- Dadka waaweyn ee isku arka calaamadaha cudurka oo keliya ayaa lagu talinayaa in ay tijaabo iska qaadaan.
- Shardiigii ahaa in gooni loo baxo waa la joojinayaa, waxaana lagu beddelayaa talo ah in dadka waaweyn ee cudurka laga helo in ay afar maalin guriga joogaan. Taladaan si joogto ah ayaa loo qiimayn doonaa, waxaana la filayaa in toddobaadyo kooban gudahood wax laga beddeli doono.
- Carruuraha dhigta xannaanada carruuraha iyo ardayda iskoollada waxaa lagula talinayaa in ay guriga joogaan marka ay xanuunsanayaan, laakiin xannaanada carruurta iyo iskoolladaba way tegi karaan marka ay xummad-la'aan ahaayeen 24 saac. Carruurta iyo ardayda iskoolladu uma baahna in ay tijaabo iska qaadaan xataa marka ay leeyihiin calaamadaha cudurka.
- Shuruudaha haray ee soo gelidda waddanka ee waajibka is-diiwaangelinta iyo tijaaba-qaadka ka hor inta aan waddanka la imaan waa la joojinayaa.

Heeganka iyo la socoshada waa la sii wadayaa

Safmarkii ma dhammaannin in kasta oo hadda la qaaday tillaabooyinka intoodii badnayd. Hirarkii cudurka ee qaboobaha ayaa socda, hirar kale oo noocyo cusub

oo fayraska ah ayaa imaan kara. Sidaas darteed ayay dawladdu ku hawlan tahay diyaarinta istiraatiijiyadda mustaqbalka fog iyo qorshaha heeganka maaraynta covid-19. Istiraatiijiyadda cusub waxaa la soo bandhigi doonaa gu'ga 2022-ka.

– Hadaf guud oo laga leeyahay istiraatiijiyadda «la noolaashada cudurka» ayaa waxay tahay in aan covid-19 ula noolaan karno hab uu dhibka ugu yar ee suuraggalka ah ka soo gaarayo qofka gaarka ah iyo bulshada guud ahaan, ayuu yiri Støre.

– Hadda kaddib waa in aan lahaanna heegan wanaagsan si loo maareeyo cudurka dillaaca iyo noocyada cusub ee fayraska. Xeerar guud oo ka kooban kurjado tillaabooyin ka-hortag cudur ah looguna tala galay xaalado kala duwan iyo heerar tillaabooyin ayaa naga caawinaya in horey wax loo sii saadaalin karo, kuwaas oo loo adeegsan karo xayiraadaha iyo fududaynta labadaba. Waa in aan xataa u diyaargarawnaa maaraynta waxyaalaha aan rajaynayno in aysan dhicin, ayay tiri Kjerkol.

Ka hor inta aan xeerarka guud la dhammaystirin, qaybaha kala duwan ee bulshada iyo kooxda khuburada ah ee Holden IV ayaa laga helayaa talooyin ku saaban sidii kurjadaha tillaabooyinka loogu aaddin lahaa meelaha inta ugu badan looga baahan yahay si culaysku qaybaha kala duwan ee bulshada uga yaraado.

Tijaabo ayaa weli layska qaadayaa ka hor intaan Svalbard la imaan iyo marka la yimaado kaddib ba

Adeegyada caafimaadka ee Svalbard waa kuwo xaddidan oo heegankoodu ka nugul yahay midka berriga, intii uu safmarku jiray oo idil na waxaa halkaas ka jiray tillaabooyin khaas ah marka loo eego kuwa berriga. Waxay dawladdu hadda joojinaysaa waajibkii saarnaa doomaha dalxiiska ee rakaabka wada ee ahaa in ay berriga ama xeebtii ay ka soo shiraacdeen ku laabtaan haddii rakaabka cudurka laga helo. Shardiigii ahaa in dadka tijaabo laga qaado imaashaha ka hor iyo kaddib weli wuu sii jirayaa, waxaa isna weli sii jiraya mamnuucii duullimaadyada caalamiga ah ee diyaaradaha gaar loo kiraystay. Meelahaan waxaa loo baahan yahay in qiimayn badan lagu sameeyo. Sidaas awgeed ayay Wasaaradda Caafimaadka- iyo Daryeelku waxay fartay Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha in ay arrintaas joogto u qiimeeyaan, waxaana la filayaa in xeerarka wax laga beddelo laba toddobaad gudahood.

Safmarku hadda ma aha «cudur la kala qaadi og yahay oo dillaacay kaas oo khatar guud oo weyn leh»

Ayada oo lagu salaynayo talooyinka cilmiga ku dhisan ee laga helay Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha ayay waxay dawladdu go'aamisay, in aan cudurka safmarka ah ee covid-19 hadda lagu qeexi karin in uu yahay «cudur la kala qaadi og yahay oo dillaacay kaas oo khatar guud oo weyn leh», ayada oo la cuskanayo xeerka ka hortagga cudurrada. Taas oo keenaysa in la qaadayo dhammaan tillaabooyinkii qiilka looga haystay xeerka ka hortagga cudurrada § 4-1 faqradda labaad.

Covid-19 waxaa weli loo arkaa in uu yahay cudur la kala qaadi og yahay oo khatar guud leh. Taas oo ka dhigan in ay degmooyinku soo rogi karaan tillaabooyin maxalli ah markii loo baahdo.

Soo-jeedinnada soo socda ayaa hadda jira Talooyinka guud ee dadweynaha

- Wanaaji nadaafadda gacmaha iyo midda qufaca
- Qaado tallaallada koroona
- Tijaabo iska qaad haddii aad isku aragto calaamadaha cudurka. Carruurta ku jirta da'da xannaanada carruurta iyo kuwa iskoollada dhigta loogama baahna in ay tijaabo iska qaadaan. Lagaagama baahna in aad tijaabo iska qaaddo haddii aadan lahayn calaamadihi cudurka in kasta oo aad u dhowaatay qof cudurka laga helay.
- Guriga joog haddii aad isku aragto calaamadaha marinnada hawada oo cusub haddii aad xanuunsan tahay. Waa in aad guriga joogtaa ilaa inta xaaladdaadu ka fiicnaanayso, oo aad 24 saac xummad-la'aan ka ahaanayso. Calaamado khafiif ah oo kugu haray sida sanko oo biyo ka socdaan, duuf, xabeeb iyo xoogaa qufac ah dhib ah ma laha.
- Haddii tijaabo covid lagaa qaado oo cudurka lagaa helo, guriga joog afar maalin oo ka billowda markii aad calaamadaha cudurka isku aragtay ama haddii aadan calaamado cudur lahayn maalintii lagaa qaaday tijaabada cudurka lagaaga helay. Carruurta ku jirta da'da xannaanada carruurta iyo kuwa iskoollada dhigta loogama baahna in ay tijaabo iska qaadaan, laakiin

waxaa lagula talinayaa in ay guriga joogaan haddii ay xanuunsanayaan. Markii ay xummad-la'aan ahaayeen 24 saac ayay aadi karaan xannaanada carruurta iyo iskoolka.

- Dhakhtarkaada joogtada ah la xiriir haddii ka welwelsan tahay caafimaadkaaga ama midka ilmahaaga

Talooyin ku socda dadka cudurka u nugul iyo dadka aan la tallaalin

- Dadka u nugul in ay aad ugu bukoodaan cudurka iyo dadka aan la tallaalin ee 18 sano ka weyni waa inay iskood isu eegaan khatarka kaga imanaysa qaadista cudurka covid-19 iyo baahida ay u qabaan in ay la kulmaan dadka kale.
- Xilliyada is-qaadsiinta cudurku badan tahay waxa wacnaan karta in la iska dhaafo meelaha dad badani ku urursan yahay, ama in la isticmaalo af-dabool. Si kastaba waxa muhiim ah in qofku aanu dadka iska qoqobin oo uu xiriir xoogaa ah la yeesho dadka.
- Dadka cudurka u nuguli guud ahaan si wacan ayay uga difaacan yihiin in ay aad ugu bukoodaan cudurka haddii ay ku dhaqmaan talooyinka ku saabsan is tallaalista, si ay markaa u noolaan karaan si la mid ah dadka kale islamarkaana u raaci karaan talooyinka ka-hortagga cudurka ee dadka kale ku dhaqmayaan.
- Dadka aad ugu nugul in ay aad ugu bukoodaan cudurka waxa lagula talinayaa in ay la tashadaan dhakhtarkooda oo kala hadlaan khatarta ku iman karta iyo in ay u baahan yihiin in ay si gaar ah isu ilaaliyaan muddooyinka ay is-qaadsiinta cudurku badan tahay. [Faahfaahin ku saabsan dadka cudurka u nugul ka akhriso bogga internetka ee FHI:](#)

Kala fogaanshaha iyo isu-imaatinka dadka

- Ka fogow dadka kale, gaar ahaan dadka cudurka u nugul, haddii aad isku aragto calaamadaha marinnada hawada oo cusub.
- Marka ay jirto dhalmo iyo marka qof aad u buko, waxa wacan in isbitaallada iyo xarumaha daryeelka ee degmooyinku ay fududdeyaan booqashooyinka, oo ay xataa u fududdeyaan ehelka iyo wehelka laga helay fayruska koroonaha.

Af-daboolka

- Waxa la joojinayaa shardiga ku saabsan af-daboolka ee xeer-hoosaadka ku soo baxay.
- Waxa lagu talinayaa in aad af-dabool isticmaashid markaad ag joogto qof cudurka u nugul, haddii aad qabtid hargab/calaamadaha marinnada hawada.
- Dadka cudurka u nugul iyo dadka aan la tallaalin waxa lagula talinayaa inay af-dabool isticmaalaan marka lagu jiro xilli is-qaadsiinta cudurku badan tahay ee ay dhex joogaan dadka kale, waa haddii ay adag tahay in laga fogaado dadka kale.

Tijaabo-qaadis ([Akhri warbixin gaar ah oo ku saabsan](#))

- Dadka 18 sano ka weyn waxa lagula talinayaa inay iska qaadaan tijaabada covid-19 haddii ay isku arkaan calaamadaha marinnada hawada oo cusub. Ma lagu talinayo in dadka aan calaamadaha isku arkin ay tijaabo iska qaadaan. Carruurta qabta calaamadaha cudurku ma u baahna in tijaabo laga qaado wixii hadda ka dambeeya.
- Haddii qofku iskii tijaabo iska qaado oo cudurka iska helo, waxa wacan inuu ka diiwaangeliyo nidaamka raadraacista is-qaadsiinta cudurka ee degmada. Tijaabada qofku iskii iska qaaday ee cudurka laga helay ma laga diiwaangelin doono helsenorge.no, mana ka muuqan doonto shahaadada koroonaha.
- Marka qofku uu iskii tijaabo iska qaado oo cudurkana laga helo waxa wacan in uu tijaabo xaqiijin ah iskaga soo qaado xarun tijaabo-qaadis haddii qofku aanu si buuxda u tallaalnayn, waa marka aanu qaadan irbadda tallaalka ee xoojinta ah. Dadka qaatay irbad xoojin ah (booster) ama dadka si aasaasi ah u tallaalan oo uu islamarkaana covid-19 ku dhacay saddexdii bilood ee u dambeeyay ma u baahna inay iska qaadaan tijaabo xaqiijin ah.
- Dadka intiisa badan waxay cudurka iska helayaan ku dhawaad xilliga calaamadaha cudurku ku bilaabmaan. Mararka qaar wakhti dheeraad ah ayaa u dhaxayn kara marka qofku isku arko calaamadaha cudurka iyo

marka tijaabada qofku iskii iska qaado sheegto in uu cudurka qabo. Haddii calaamadaha cudurku tegi waayaan isla markaana tijaabooyinka qofku iskii iska qaado sheegayaan in aanu qabin cudurka, waxa lagu talinayaa in tijaabo cusub la iska qaado 2-3 maalmood ka dib.

Gooni-u-bixid

- Waxa la joojinayaa shardigii gooni-u-bixidda ee xeer-hoosaadka ku soo baxay, waxaana lagu beddelayaa soo-jeedin ku saabsan in dadka 18 sano weyn ee la xaqiijiyay inay qabaan covid-19 ay guriga joogaan 4 maalmood laga bilaabo markii ay isku arkeen calaamadaha cudurka oo ay si kastabana guriga joogaan ilaa ay 24 saacadood ahaayeen xummad-la'aan.
- Haddii ay lagama maarmaan noqoto in qofka cudurka qabaa uu shaqada yimaado si aanay shaqadu u istaagin, waxa jira talooyin gaar ah oo ku saabsan ka-hortagga is-qaadsiinta oo ku saabsan sida arrintaas loo fulin karo. Eeg bogga internetka ee FHI.
- Soo-jeedinta ku saabsan in guriga la joogo 4 maalmood ma khuseeyo carruurta jira da'da xannaanooyinka iyo ardayda iskoollada, oo waxa keliya oo iyaga lagula talinayaa inay guriga joogaan haddii ay bukaan.

Raadraacista is-qaadsiinta cudurka

- Wixii hadda ka dambeeya ma jirayso soo-jeedin ku saabsan in dadka laga helay fayruska koroonuhu ay ogeysiyaan dadkii kale ee u dhawaaday.
- Xaaladaha qaarkood waxa loo baahan karaa in degmadu ay raadraacis ku samayso is-qaadsiinta, tusaale ahaan inay caawiso xarumaha degmada haddii cudurku ka dillaaco.

Karantiilka

- Waxa la joojiyay 1-dii febraayo, iyadoo lagu beddelay rajiiim tijaabo-qaadis ah.

Iskoollada, xannaanooyinka iyo SFO-yada ([Akhriso warbixin gaar ah oo ku saabsan](#))

- Waxa la joojinayaa waajibkii ku saabsanaa in hawlaha loo fuliyo qaab aan lid ku ahayn hortagga is-qaadsiinta cudurka ee ku soo baxay xeer-hoosaadka covid-19, waxaana taas darteed la joojinayaa tallaabooyinka habka midabyada nalka samaanfalaha.
- Waxa la soo jeedinnayaa in hawluhu u socdaan sidii caadiga ahayd oo markaana waafaqsan talooyinka ka-hortagga is-qaadsiinta cudurka ee dadweynaha.
- Waxa weli iskoollada iyo xannaanooyinka carruurta khusayn doona shardi ku saabsan ka-hortagga cudurka, sida uu dhigayo xeer-hoosaadka ku saabsan caafimaad-ilaalinta la xiriirta bey'adda xannaanooyinka carruurta iyo iskoollada iyo meelaha kale, oo shardi ka dhigaya in shaqada loo qorsheeyo, loo fuliyo oo loo dhammaystiro hab ka hortagaya is-qaadsiinta cudurka. Hagaha koroonaha ee FHI waxa weli ka mid ahaan doono talooyin ku saabsan covid-19 u gaar ah xannaanooyinka iyo iskoollada.
- Waxa shaqobixiyaha lagula talinayaa inuu xaaladaha shaqada ee goobaha waxbarashada fududdeeyo si dadka cudurka u nuguli u helaan maalin shaqo oo ku habboon xaaladooda.
- Taloooyinka ku socda goobaha shaqada iyo shirkadaha (FHI) ayaa ah talooyin ka-hortag cudur oo ku filan shaqaalaha. Taloooyinka ka-hortag cudur oo u gaar ah xannaanooyinka iyo iskoollada waxa laga helayaa macluumaadka ku jira hagaha koroonaha ee FHI, hoosta qaybta Taloooyin ku saabsan ka-hortaga is-qaadsiinta cudurka ee iskoollada iyo xannaanooyinka carruurta.
- Habka midabyada nalka samaanfalaha waa la sii wadayaa isagoo ka mid noqonaya heegan hage sheegaya tallaabooyinka yaraynaya isu dhawaanshaha dadka ee lagu talinayo in la isticmaalo marka xaaladda is-qaadsiinta cudurka ee ka jirta degmadu ay lagama maarmaan ka dhigto isla markaana ay habboon tahay in tallaabooyin ka hortag ah lagu soo rogo iskoollada iyo xannaanooyinka carruurta. Degmadu waxay go'aamin kartaa in la isticmaalo habka midabyada nalka samaanfalaha haddii ay buuxaan shuruudka ku yaalla xeerka ka-hortagga cudurrada.

Jaamacadaha iyo dugsi-xirfadeedyada sare

- Waxa la joojinayaa waajibkii ku saabsanaa in hawlaha loo fuliyo qaab aan lid ku ahayn hortagga is-qaadsiinta cudurka ee ku soo baxay xeer-hoosaadka covid-19.
- Waxase weli khuseeya shardi ku saabsan in hawlaha loo fuliyo qaab ka hortagaya cudurka oo waafaqsan xeer-hoosaadka ku saabsan caafimaad-ilaalinta la xiriirta bey'adda, oo khuseeya goobaha shaqada oo dhan, oo shardi ka dhigaya in shaqada loo qorsheeyo, loo fuliyo oo loo dhammaystiro hab ka hortagaya is-qaadsiinta cudurka.
- Waxa la soo jeedinayaa in hawlaha u socdaan sidii caadiga ahayd oo markaana waafaqsan talooyinka ka-hortagga is-qaadsiinta cudurka ee dadweynaha.
- Waxa shaqobixiyaha lagula talinayaa inuu xaaladaha shaqada ee goobaha waxbarashada u fududdeeyo dadka cudurka u nugul.

Shaqooyinka

- Waxa la soo jeedinayaa in hawlaha u socdaan sidii caadiga ahayd oo markaana waafaqsan talooyinka ka-hortagga is-qaadsiinta cudurka ee dadweynaha.
- Waa in shaqobixiyuhu iskii qiimeeyo baahida loo qabo in la yareeyo is-qaadsiinta oo uu nidaam u sameeyo shaqaalaha. Waxa muhiim ah in goobaha shaqadu ay fududdayn u sameeyaan dadka cudurka u nugul.

Qabanqaabooyinka iyo isu-imaanshooyinka dadka

- Waxa la joojinayaa waajibkii ku saabsanaa in hawlaha loo fuliyo qaab aan lid ku ahayn hortagga is-qaadsiinta cudurka ee ku soo baxay xeer-hoosaadka covid-19. Tan oo macnaheedu yahay in wixii hadda ka dambeeya aan qabanqaabiyeyaasha laga rabin shuruud ku saabsan tirada dadweynaha imanaya qabanqaabo/kulan ama shardi ku saabsan inuu dadka u fududdeeyo inay kala fogaadaan.
- Waxase weli khuseeya shardi ku saabsan in hawlaha loo fuliyo qaab ka hortagaya cudurka oo waafaqsan xeer-hoosaadka ku saabsan caafimaad-ilaalinta la xiriirta bey'adda, oo khuseeya goobaha shaqada oo dhan, oo

shardi ka dhigaya in shaqada loo qorsheeyo, loo fuliyo oo loo dhammaystiro hab ka hortagaya is-qaadsiinta cudurka.

- Waxa la soo jeedinayaa in hawluhu u socdaan sidii caadiga ahayd oo markaana waafaqsan talooyinka ka-hortagga is-qaadsiinta cudurka ee dadweynaha.

Goobaha cuntada/cabbitaanka iyo meheradaha kale

- Waxa la joojinayaa waajibkii ku saabsanaa in goobaha cuntada/cabbitaanku iyo meheradaha kale ay hawlaha u fuliyaan qaab aan lid ku ahayn ka hortagga is-qaadsiinta cudurka ee ku soo baxay xeer-hoosaadka covid-19.
- Wax xadidnaan ah ma saarna nooca hawlaha la qaban karo iyo masaafada la isu jirsan karo.
- Waxa la soo jeedinayaa in hawluhu u socdaan sidii caadiga ahayd oo markaana waafaqsan talooyinka ka-hortagga is-qaadsiinta cudurka ee dadweynaha.
- Waxase weli meheradaha oo dhan khuseeya shardi ku saabsan in hawlaha loo fuliyo qaab ka hortagaya cudurka oo waafaqsan xeer-hoosaadka ku saabsan caafimaad-ilaalinta la xiriirta bey'adda. Waa in hawlaha loo qorsheeyo, loo fuliyo oo loo dhammaystiro hab ka hortagaya is-qaadsiinta cudurka.

Soo gelidda waddanka

- Waa la joojinayaa shardiga ku saabsan in tijaabo cudurka laga waayey la iska soo qaaday ka hor intaan waddanka la soo gelin iyo shardiga ku saabsan diiwaangelinta soo gelidda, ee xeer-hoosaadka ku soo baxay.
- Waxa weli sii jiri doona shardiga ku saabsan tijaabo la iska qaado ka hor intaan loo dhoofin iyo marka la tago Svalbard. Sidaa si la mid ah waxa jiri doona madnuucista duulitaannada diyaaradaha gaar loo kiraystay ee caalamiga ah.